

Nooca Gaaban

Isbeddelo la xiriira federaalka awgood, laga bilaabo Janaayo 1, 2027, xubnaha ka tirsan OHP qaarkood ee da'doodu tahay 19–64 waa in ay buuxiyaan xeerarka shaqada ama hawsha marka ay codsadaan ama dib u cusbooneysiyaan caymiskooda. Waalidiin ama daryeel bixiyayaal badan ayaa laga dhaafay, kaasi oo ka dhigan in aysan u baahnayn in ay buuxiyaan xeerarka (jidka 1). Daryeel bixinta waxaa sidoo kale lagu xisaabin karaa buuxinta xeerarka (jidka 2). Ogow: In ka badan hal qof oo qoyskaaga ka mid ah ayaa loo xisaabin karaa daryeele ahaan.

✓ Laba Siyaabood oo Waalidiinta ama Daryeel bixiyayaashu U buuxin Karaan Xeerarka

Dooro jidka ku habboon noloshaada.

✓ **Jidka 1:** Waxaad la nooshahay ama qaraabo tihiin qof aad daryeesho: tani waxaa ka mid ilme da'diisu ka yar tahay 14 jir ama qof da'kasta leh oo qaba xaalad caafimaad oo halis ah ama naafanimo keenaysa.

⌚ **Jidka 2:** Waxaad daryeeshaa qof aanan qaraabo kula ahayn ama aan joogin gurigaaga oo aad soo sheegto saacadaha daryeel bixinta.

Jidka 1: Haddii ay qaraabo yihiin AMA ay kula nool yihiin	Jidka 2: Haddii aan qaraabo la ahayn OO aysan kula noolayn
<p>Waa lagaa dhaafay umana baahnid in aad buuxiso xeerarka. U sheeg OHP in aad tahay waalidkiisa, qaraabadiisa, ama daryeel bixiyihiisa. Haddii uu ka tirsan yahay kiiskaaga, tani sida caadiga ah hore ayay faylka ugu jirtay.</p> <p><i>Ma waxaad tahay mas'uul sharci ah, ma aha waalid ama qaraabo? Waxaad u baahnaan doontaa amar maxkamadeed ama dokumenti sharci ah.</i></p>	<p>U sheeg OHP in aad bixiso ugu yaraan 80 saacadood oo ah daryeel bishii. Ma bixisid miyaa 80 saacadood bishii? Waad isku dari kartaa saacadahaaga daryeel bixinta oo ay la socdaan hawlo kale (sida shaqada, tabarucaada, dugsi, ama tababar) si aad u buuxiso xeerarka.</p> <p><i>Ilaa 2027, u sheeg OHP saacadahaaga. Laga bilaabo 2028, soo dir kaalandar, jadwal, ama caddeyn kale oo ah saacadahaaga.</i></p>

❓ Waxaa jira Siyaabo Kale oo Lagu buuxiyo Xeerarka

Booqo <https://OHP.Oregon.gov/HR1> si aad u hesho liiska buuxa ee waxyaabaha la iska dhaafayo iyo hawlaha wax loogu qalmo.

Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP: Waxa ay tahay In la ogaado Haddii aad tahay Waalid ama Daryeel bixiye



Haddii OHP Macluumaad Dheeraad ah Kaaga Baahan tahay

Waxaad heli doontaa ogeysiin sheegaysa waxa la dirayo, sida, iyo goorta ay tahay. Ma haysatid miyaa warqada saxda ah ee ku qoran ogeysiintaada? U sheeg OHP waxa aad haysato. Waxaa jiri karta siyaabo kale oo aad ku muujiso caddeyn.

Waxa aad Sameyn Karto

- ✓ Cusbooneysii macluumaadka lagaala soo xiriirayo iyo wada xiriirka aad doorbidayso. Fariinta qoraalka ah iyo email-ka ayaa si cusub loo hagaajiyay!
- ✓ Ka soo jawaab ogeysiin kasta iyada oo leh taariikh ay ku eg tahay.
- ✓ Hubi waxyaabaha la iska dhaafayo ama siyaabo kale oo lagu buuxiyo xeerarka.

Halka Laga helo Caawimaad oo laga Ogaan karo Waxyaabo Dheeraad ah



Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan HR1

<https://OHP.Oregon.gov/HR1> →

Dhanka internet-ka - isticmaal App-ka Oregon ONE Mobile ee lacag la'aanta ah ama samee koontada Dhanka internet-ka ee ONE

<https://benefits.oregon.gov>

Wac

1-800-699-9075 (Wicitaanada gudbinta waa la soo dhaweynayaa)

Hel kaaliyaha OHP

<https://oregonhealthcare.gov/GetHelp>

Booqo xafiiska Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon

Xafiiska degaanka ka hel
<https://ODHSoffices.oregon.gov>

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. OHP kala xiriir one.communications@odhsosha.oregon.gov.